

Faa'iidada laga helo Booqashada waqtiga uurka

Tilbud om graviditetsbesøg



Somalisk

Khidmada caafimaadka

Khidmada caafimaadka ee kamuunka Egedal waxay u qoondeeyaan kalkaaliso caafimaad hooyooyinka uurka leh.

Booqashada waxay ka dhacaysaa gurigaaga, qiyaastii 1 saac, booqashadan waxaa loo qaybiyaaa qiyaastii 7 bilood oo uurka inta uu socda ah.

Kulanka lala yeelanayo kalkaalisada caafimaad, wuxuu ku siinayaa fursada ah inaad kala hadasho uurkaaga iyo inaad noqon doonto hooyo, iyo waxaad kaloo isla meel dhigaysaan habka ugu fiican ee lagu caawin karo, markaad dhasho ka dib.

Waa ay fiican tahay in aad is aragtaan inta lagu jiro waqiga uurka.

Haddii dhakhtarkaaga ama umulisado ay uqiimeeyaan, inaad wax uun ka faa'iidayso booqashada kalkaalisada caafimaad, waa ay kuu qabanayaan.

Booqashada waxaa suurtagal kuu noqonaya inaad isla meel dhigtaan:

- Uurka iyo waqtigiisa
- Waxyaabaha aad u baahan tahay
- Dhalida
- Naas nuujinta
- Baaahida ilmaha
- Xaaladaada/xidhiidhadaada
- Waalidnimada
- Xaalada qoys ahaaneed
- Galmada
- Qoyska/asxaabta
- Walaalada
- Khibradaada
- Waxaad filanayso
- Nolosha guud
- Wixii kaloo aad jeceshahay

Waa wax fiican inay jirto wada shaqayn fiican, oo aad kasoo qayb gashaan labada waalidba booqashooyinka. Haddii aad hooyo kaliya tahay, waa caawinaad wayn inuu kula jooga qof kale uu kuu dhow.

Haddii ay jirta mushkilad hore oo kaala soo gudboonaatay uur hore, ama hadaba ay jiro mushkilad ku haysata, waa inaad kala hadashaa kalkaalisada caafimaad ko hor inta aan dhalida la gaarin.

Kormeeraha caafimaad caafimaad waxay taqaanaa qaybaha kala duwan ee kamuunka, oo haddii aad u baahan tahay caawinaad dheeri ah, waxay la xiriiri meesha ku haboon in laga daboolo baahidaada.



Kormeeraha caafimaad waxaa si khaas ah, loogu tababaray caafimaadka qoyska, dhalaanka iyo dhalinta.

Kormeeraha caafimaad waxay leedahay waxbarshada kalkaalinta caafimaad, oo waxay leedahay khibrad sanaddo badan ah, gaar ahaan xaga qoyska iyo caruurta. Intaa waxaa u sii dheer in kormeeraha caafimaad, uu qaatay waxbarasho khaas ah, oo ku wajahan caawinta qoyska, dhalaanka, dhalinta, haweenka uurka leh iyo waalidiinta.

Haddaad jeceshahay inaad hesho booqasha xiliga uurka, waxaad la xidhiidhi kartaa khidmada caafimaadka.

Sakrtaariyada waxaa la heli karaa isniinta - khamiista. saacada 8-14, waxaad kala hadli kartaa telefon nr. 72596720

E-mail: sundhedstjenesten@egekom.dk

Madaxa kormeerka caafimaad Nina Rasch, waxaa lagala xidhiidhi karaa teleefoon nr 72596734 iyo
E-mail: nina.rasch@egekom.dk

Waxaad ka akhrin kartaa wax badan oo ku saabsan shaqada khidmada caafimaadka iyo waxa ay u qabtaan dadka, barta ay ku leeyihiin interneetka:

www.sundhedstjenesten-egedal.dk



Kamuunka Egedal
Khidmad caafimaadka
Dronning Dagmars Vej 200
3650 Ølstykke

